



GOLAHA ISKAASHIGA DOWLAD GOBOLEEDYADA -GIDG-

Ref: CIC/0021/10/2018

Taariikh: 11-10-2018

Ku: Cabdullahi Sheekh Xasan

OG: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntland

OG: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed

OG: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubaland

OG: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

Ujeedo: Magacaabis Afhayeenka Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada

Kadib markuu qadariyey : Aragtida Xubnaha Golaha ee ku aadan in la helo cod midayasan

Kadib markuu tixgaliyey : Mabaadida, ahdaafta iyo mideynta Siyaasadaha Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyadu ku dhisan yahay;

Kadib markuu tixraacay : Habraacyada iyo qorshaha hawl fulineed ee Golaha

Kadib markuu qadariyey : baahida loo qabo in Goluhu yeesho Afhayeen u gaar ah

Gudoomiyaha Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada wuxuu xeeriyey in Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyadu yeesho Afhayeen guud oo ku hadla Afka rasmiga ah ee Golaha.

Waxaana Afhayeenka Golaha loo magacaabay **Mudane Cabdullahi Sheekh Xasan** oo hadda wixii ka dambeeya ku hadli doono Afka rasmiga ah ee Golaha Iskaashiga.

Afhayeenka Golaha ee kor ku magacaaban waxaa laga rajeynayaa in uu ku shaqeeyo danaha, iskaashiga, habraacyada iyo Siyaasadda mideysan ee Golaha.

Magacaabistan waxay dhaqan galeysaa marka uu saxiixo Gudoomiyaha Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada.

Mahadsanidiin

Mudane Dr.Cabdiweli Maxamed Cali (Gaas)

Madaxweynaha Dowlada Puntland ahna Gudoomiyaha Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada.